Somali

Germany- Dublin lll

# Ha ka baqin Tarxiil
# Sida loo joojiyo Tarxiilka Dublin-ka




Waxaa dib loo qoray 2017

Haddii faraha lagaaga qaado mid ka mid ah dalalka yurub, tusaale ahaan sida Talyaaniga, Bulgaariya, Hangari, ama Gariiga, dabadeedna aad iska dhiibto dal kale waxa laga yaabaa in dib laguugu celiyo halkii markii hore faraha lagaaga qaaday sida uu qabo sharciga Dublin. Haddii lagugu handado Tarxiil-ka DUBLIN, macnaheedu ma'aha in lagu tarxiilayo. Waxaa jiro dad badan oo ka guuleeystay Caqabadaha tarxiilka, codsiyadooda magen-gelyo doonka ahna lagu qaaday dalka Jarmalka. Ilaa hadda dadka dib loo celiyey ama la tarxiilay ma dhama boqolkiiba toban 10%. Haddaba tallaabada ugu horreeyso waa inaad ogaato xaqa aad u leedahay inaan lagu tarxiilin.

Waxaa jira dood ka taagan maxkamadaha Jarmalka taasoo ku saabsan dalalka dadka loo tarxiilo qaarkood sida (Talyaaniga, Hangari, Bulgaariya, Malta IWM) Maxkamadaha qaarna waxay gaareen Go'aanno ka soo hor-jeedo tarxiilka. Go'aannadaas waxa ka mid ah kuwa quseeyo dadka naftooda la soo baxsaday oo noloshoodu halis geli karto haddii dib loo celiyo, qoysaska carruurta yar-yar haysto, kuwa caafimaad-koodu liito, kuwa dhibaatooyinku ay ku soo dhaceen). Haddaba haddii aad faro ku leedahay dal kale, la xiriir Qareen ama kooxaha khubarada ah si ay kuu siiyaan talooyin muhiim ah.

Xattaa haddii farahaada laga helo Computerrada dowladduna qorsheyso inay kuu tarxiisho dal kale oo yurub ah, xagga sharcigana aad ku guuleeysan weydo, waxa jira siyaabo badan oo aad uga hor tegi karto tarxiilka, waxana ka mid ah kuwa hoos ku qoran.

**FIIRO-GAAR AH:** Farqi ayaa u dhexeeya farihii lagaaga qaaday dalkii ugu horreeyey ee aad soo gashay iyo faraha lagaa qaaday marka aad Megen-gelyada codsatay. Dadka diidmada laga siiyey waddan yurub ah laftoodu waxay waajihi karaan dhibaato waxayna u baahan yihiin talooyinka dadka arrimahaas aqoonta u leh. Sidaas si la mid ah dadka sharciyada ka helay dal yurub ah tusaale ahaan Talyaaniga, laftoodu waxay wajihi karaan dhibaato kale. Kuwaas kiisas-koodu ma raacayaan xeerarka DUBLIN, laakiin waa la tarxiilayaa iyadoo loo cugsanayo heshiisyo kale. Macluumaadkaan hoose waxa ay quseeyaan dadka aan sharci ka helin waddan kale oo yurub ah.

## SIDEE AYUU U SHAQEEYA XEERKA DUBLIN-ku?

Sida caadiga ah Dowladdu waxay qaadeeysaa farahaada si ay u diiwan-geliso, dabadeed waxay bar-bar dhigeeysaa Macluumaad kale oo ku jiro Kumbuyuutarrada dalalka yurub kaasoo ku jiro habka la yiraa EURODAC. Dowladdsu waxa kale oo ay ku weydiineeysaa su'aalaha ay ka mid yihiin: Sidee ayaa ku timid? Xaggee soo martay IWM. Intaas dabadeed dowladdu iyaddoo ku saleyneyso Macluumaadka halkaa ka soo baxo, waxay go'aan ka gaarayaan ineey ayagu qaadayaan masuuliyadda codsigaada magen-gelyo doonka ah iyo iney qaadeeyso dowlad kale oo aad soo martay. Haddaba haddii ay farahaada ka helaan ama macluumaad kale oo caddeeynayo inaad soo martay dal kale oo Yurub ah, dalkaas aad soo martay ayey weeydiinayaan haddii uu oggol yahay in lagugu celiyo iyo haddii kale. Intaas dabadeed haddii aanay dalkaas ka imaan diidmo ku saleysan sharci amaba uusan ka soo jawaabin, waxad heli doontaa baqshad jaalle ah, taasoo laguugu sheegayo waqtiga lagu tarxiilayo.

Haddaba waxa jiro war wanaagsan kaasoo ah; in dad badan oo farahooda laga helay waddamo kale aan la tarxiili doonin. Annagoo kaashaneyna khibrada iyo waaya-aragnimada aan arrintaan u leennahay, waxan dhihi karnaa inta la tarxiilay oo dalalkii ay soo mareen dib loogu celiyey aad beey u yartahay. Farihii ku jiray EURODAC lama tirayo laakiin tarxiilku wuxuu leeyahay waqti maxduud ah. Tusaale ahaan haddii faraha lagaaga soo qaaday dalalka Bulgaariya, Talyaaniga, Hangari IWM, waqtiga muxaddadka ah ee lagu tarxiili karaa waa 6 bilood gudahood. Lix bilood wixii ka dambeeya laguma tarxiili karo.

**MUHIIM** waa inaad OGAATO lixda bilood kama billaabanayaan maalinta aad dalkii hore soo gashay,laakiin waxay ka billaabaneysaa maalinta fayl-kaada laga helo xafiiska magan-gelya doonka. Waqtiga tarxiilka waa la beddeli karaa haddii aad abbiil maxkamadeed ku joojiso. Dabadeed haddii maxkamaddu abbiil-kaada diido waxa kuu billaabanayo lix bilood oo lagu tarxiili karo. Sidaas datrteed waa inaad mar walba ogaato waqtigaadu goorta uu ku xaddidan yahay.
**DIGNIIN:** Waxa kale oo aad ogaataa in waqtiga la dheereyn karoo oo la gaarsiin karo ilaa 18 bilood hadii aad is qariso.

### Da'deydo waxay ka yartahay 18 keligeyna waan imid, haddaba ma ley tarxiilayaa?

Carruurta da'doodu ka yartahay 18 ee aan waalidkoodu la socon, ma jiro sharci u diidayo iney joogaan waddan khaas ah, weliba waxay dhowr jeer magan-gelyo ka codsan karaan dalalka yurub. Intii ay ka helayaan sharci waxay xaq u leeyihiin iney si xor ah u dhex socdaan yurub. Haddii dalkii koobaad ee faraha looga soo qaaday loogu qoray da'weyn oo been ah, Jarmalku dib uma celinayo haddiiba da'da halkaan loogu qoray ay 18 ka yar tahay.
Haddaba ogoow, dalalka yurub oo dhan habkaas kuma dhaqmaan. Waxaynu ognahay tusaale ahaan dalka Nederland waxay aqbalayaan oo keli ah, da'dii aad sheegatay markii ugu horreeysay ee interfiyuuga/wareysiga lagaaga qaaday dal yurub ah. Tusaale ahaan haddii Bulgaariya lagaaga diiwaan geliyey qof qaan-gaar ah, Nederland waxaad ahaaneeysaa qof qaan-gaar ah. Haddaba hubi inaad is diiwaan-geliso intaadan qaan-gaarin (intaad 18 ka yar tahay). Ogow haddii dowladdu baaritaan dabadeed soo caddeeyso in da'daadu weyntahay, da' yarna aadan ku diiwaan-gashaneyn waxaad khatar ugu jirtaa in lagu tarxiilo iyadoo laguu cugsanayo xeerka Dublin.

## Maxaan sameyn karaa haddii aan khatar u galo in la ii tarxiilo wadan Dublin ah?

Waxaad halkaan ka heli kartaa macluumaad muhiim ah kuwaas oo aad uga bad-baadi karto in lagaa tarxiilo dalka Jarmalka iyadoo laguu cugsanayo xeerka DUBLIN. Waxa jiro sababo badan oo suurto geli karo inaan lagu tarxiilin.

**1) Saaxiibo sameyso!**
Sida dadaallada kale si la mid ah, waad ku guuleeysan kartaa inaad tarxiilka ka bad-baaddo haddii aad awooddo inaad sameysato asxaab. Asxaabtaada waa ineey ku jiraan dad khubaro ah iyo lataliyayaal aqoon u leh tarxiilka DUBLIN iyo sida looga baaqan karo, qareen, dhaqtar wanaagsan, iyo saaxiibo ku dhiirri geliyo kuna siiyo meel aad seexato waqtiga xaaladdu kuugu adagtahay.

**2) Qoro Sheekadaada waddanka aad soo martay ee lagugu hanjabayo in laguu tarxiilayo tusaale ahaan Talyaani, Hangary ama Bulgariya.**
Qoro Xaaladihii nololeed ee liitay, xad-gudubkii xuquuqul insaanka ee aad kala kulantay waddankaas lagugu celinayo. Haddii aad hayso Sawirro ama qoraallo caddeeynayo dhibaatooyinka aad dalkaas kala kulantay, haddii ay jiraan warqado Taqtar ama ururada samafalka ee caddeeynayo xanuun ama dhaawacyo halkaas kugu gaaray keydso, oo ku kaydso meelo markii aad u baahato aad ka heli karto sida Facebook, E-mail IWM. Waxa laga yaabaa dhibaato ku soo martay laakiin aan adiga macno weyn kula lahayn haseyeeshee laga yaabo ineey Looyarkaada/Qareenkaaga muhiim u noqoto si uu Tarxiilka kaaga difaaco sidaas darteed qoro oo keydso wax kasta oo ku soo maro. Haddii waqti badan ay kasoo wareegatay waxa laga yaabaa inaad kala hilmaanto/ilawdo sidaas daraadeed wax walba hore ka qoro oo xafido. Dadka qaar ayaa xasuusan waaya xattaa magacyada xabsiyadii lagu soo xiray iyo taariikhihii la xiray, Haddaba haddii Xuduud lagaa celiyey, haddii Booliis ama Militari ku garaaceen, ku laadeen,ama ku cabsi geliyeen ama ku xireen, haddii aad weysay meel aad seexato oo aad bannaanka iyo gidaarada waddooyinka ku hoyatay/jiifsatay, haddii aad weysay wax aad cunto, iyo dhammaan caqabadaha aad la kulantay ee kuu diiday inaad halkaas Mustaqbal ku yeelato. Arrimahaas oo dhan qoro Looyarkaadana u sheeg si markuu Tarxiilka kaa difaacayo u soo daliishado.

**3) Marka aad timaado la xiriir Kooxaha dadka caawiyo si ay kuula taliyaan!**
Haddii Faraha lagaaga soo qaaday mid ka mid ah dalalka Yurub sida Italy, Hungary, Bulgaria, Croatia ama dal kale oo ka mid ah Midowga yurub, si deg-deg ah ula xiriir ururrada dadka caawiyo ee jooga magaalada aad deggen tahay. Inta badan Kiisaska noocaan ahna waxay u baahanayaan Looyar/Qareen. Haddaba la tasho ururradaas si ay kuugu xiraan looyar Khibrad u leh oo kaa difaaco Tarxiilka Dublin. Linkigaan hoose laftiisa waxaad ka heli kartaa macluumaad wax tar leh: http://w2eu.info/germany.en/articles/germany contacts.en.html. Sidoo kale la xiriir Emailkaan hoos ku qoran. proasyl@proasyl.de.



**4) Qabso Qareen xaqaagana uga dood maxkamdda horteeda!**

Waxaad latashataa dadka si ay kuugu sheegaan Qareenada Khibrada u leh kiisaska DUBLIN. Sida caadiga Qareenadu waxay qaataan lacag.Xataa hadii aadan lacag heysan waxaad kula heshiin kartaa inaad u siiso bil bil taa oo aad kajareyso lacagta ceyrta ah ee aad ka qaadato Social-ka.

Marka aad hesho warqada tarxiilka si degdeg u raadso Qareen.Ogow Qareenku wuxuu heystaa 1 asbuuc kaliya si uu Racfaan uga qaato tarxiilka.

Fursada ah in la joojiyo tarxiilka DUBLIN maxkamadda horteeda inta badan waa la aqbalaa marka ay tahay Talyaaniga,Bulgaariya,Hangari iyo Maalta, maxaa yeelay in badan oo Qaadiyada kamid ah way ogyihiin dhibaatada qaxootiga ku heysata dalalkaasi.

Laakin ogow maxkamadaha laftooda farqi weyn ayaa u dhaxeeyo adiguna ma dooran kartid maxkamadda kiiskaada qaadeyso. Si aad u ogaato talaabooyinka sharciga ah ee kuu banaan akhri qoraalada dambe.

**5) Hadii aad qabto dhibaato caafimaad ama mid maskaxeed raadso Daqtar wanaagsan ama Daqtar dhimirka ah!**

Si aad Racfaan uga qaadato tarxiilka waa muhiim inaad cadeyso sida aad ugu nugushahay xaaladaha wadanka laguugu tarxiilayo,waliba hadii aad heysato cadeymo muujinaya inaadan halkaas ku noolaan karin.

Hadii aad tahay qoys leh caruur 2 sano ka yar,qof xanuunsan,qof maskax ahaan xanuunsan ama aa tahay hooyo kali ah oo wadata caruur iyo wixii lamid ah ogow uma badna in lagu tarxiilayo. Haddaba si wanaagsan u diyaarso wixii aad heli karto oo dukuminti ah. Qareenadu waxay u baahan yihiin dukumintiyo si ee kuugu doodaan,sidaas darteed marhoreba sii diyaarso wixii qoraalo cadeyn ah oo ay kuu qoreen Dhakhaatiir, Dhaqaatiirta Dhimirka, Shaqaalaha Gar-gaarka IWM.

**6) Fadlan sheeg hadii qoys kugu tiirsan ama adigu aad ku tiirsan tahay ay joogaan Jarmalka!**

Hadii xubno katirsan qoyskaaga ay joogaan dalka Jarmalka u sheeg Qareenkaaga iyo Dowladda una cadeey sida ay kuu caawiyaan ama adigu aad u caawiso dadkaasi qaraabadaada ah.Isku tiirsanaantaasi waxay kaa caawin kartaa inaan laguu tarxiilin wadan kale oo Yurub ah,Tusaale ahaan hadii ay joogto hooyadaa oo waayeel ah oo aan isku filneyn ama caruur aan qaan-gaar eheyn oo qaraabadaada ah kuwaas oo aan laheyn dadkaloo caawiya IWM. Way wanaagsan tahay inaad dowladda u sheegto xiriirka qaraabanimo ee dadkaa kaala dhaxeeya markaa waxaa suurto-gal ah in aanan dowladdu ku tarxiilin dadkaasi dartood.

**7)Xataa hadii maxkamadu ay go'aamiso in lagu tarxiilo,wali waxaa jira fursado kale oo aad uga baxsan karto tarxiilka:**

Waxaa jira dad badan oo ka hortagay tarxiilka xataa maxkamadu markii ay diiday kadib. Tarxiilku wuxuu leeyahay waqti xadidan kasoo ah 6 billood oo ka bilaabaneyso maalinta maxkamadu ay go,aamisay tarxiilka.Marka 6 bilood la dhaafo kadib waxaa masuul kaa noqon doono dalka Jarmalka mana lagu tarxiilayo. Ogow way jiraan dad badan oo dhaafay waqtigaasi oo ka badbaaday tarxiilka.

A. Akhri tusaalahaan hoose si aad u fahanto talaabooyinka ay qaadeen dad ka badbaaday tarxiilka.

- Magaalada la yiraahdo Osnabrück Boqolaal qaxooti ah ayaa isu-uruursaday si ay uga hortagaan tarxiilka waxay sameysteen Baaq ah in ay isku fooriyaan marka Boolisku yimaado. Inta badan Booliska tarxiilku waxay yimaadaan habeenki sidaas darteed boqolaalkaasi qaxootiga ah waxay sameysteen waardiye,waardiyuhu markay arkaan Booliska waxay bilaabaan inay fooriyaan markaas ayay dadkoo dhan soo wada baxaan iyada oo halkaasi ka bilaabata buuq iyo foori taasi oo sababta in Boolisku ay goobtaasi isaga tago.
- Sidaa si lamid ah waxaa jira xerooyin kale oo qaxootiga ku jira ay si wada jir ah u sameyteen xeelado ay uga baxsadaan Booliska tarxiilka.
- Inaad is qariso lafteedu waxbay kuu tareysaa: dad badan way ka maqnaadaan goobta xilliga ay Boolisdku imaanayaan. Ma´aha inay wada dhuunteen laakin marwalba way kusoo noqdaan Kaamka si warqadaha Boostada ay u uruursadaan. Saaxibadooda Kaamka ku jira ayaa marwaliba la shaqeeya sidaa darteed uma qorna inay yihiin dad baxsad ama is qarinaya (xaaladaas waxay kusii jiri karaan ilaa iyo 18 bilood). Hadii ay dhacdo Boolisku inu yimaado Kaamka oo ay weydiiyaan (aaway hebal/heblaayo) saaxibka la weydiiyay wuxuu ugu jawaabi karaa Booliska ´´shalay ayaa igu dambeysay ama saacado ka hor waa uu joogay´´.

B. Waxaa jira Kaniisado magan-galyo siiya qaxootiga ka baxsanaya tarxiilka.Si aad u hesho Kaniisad ku caawiso weydii saaxiibadaa. Laakin ogaw waqti xaadirkaan dad badan ayaa magan-galyo weydiistay Kaniisadaha sidaa darteed helitaankeeda ma sahlana. Markaa waxaad u baahan tahay inaad sugto muddo ama aad raadiso hab kale oo aad tarxiilka uga badbaadi karto.

C. Waxaa kale oo jira dad xanuunsan oo maskax-ahaan ama jir-ahaan u xanuunsanaya kuwaas oo aan safar geli karin maxaa yeelay waxaa laga yaabaa in naftoodu khatar gasho ama dad kale ay dhibaato gaarsiiyaan,sidaa darteed hadii aad qabto xanuunadaasi waxaad u baahan tahay in aad Isbitaalka tagto ama Dhaqtar soo cadeeya inaadan safar geli karin xanuunkaa dartii.

D. Waxaa suurto-gal ah in lagaaro go´aan oo masuuliyada lagu wareejiyo dalka aad ka timid. Dhamaan talaabooyinkaas aan soo sheegnay inta aad ku jirto waxaad u baahan tahay saaxiibo ku garab taagan oo ku caawiyo.

**FIIRO-GAAR AH:** Maadaama qaxooti aad u tiro badan ay soo galeen wadanka Jarmalka nidaamku waa mid isku qasan/dhexyaacsan. Daahida natiijada kiisaska qaar waxay horseedaa in waqtiga tarxiilku dhamaado. Sida uu qabo sharciga tarxiilka ee DUBLIN mar hadii la dhaafo waqtiga xadidan ee tarxiilka laguma tarxiili karo. Markasta oo waqtiga uu sii dheeraado adiga ayay dan kuu tahay. Laakin Qareenkaagu wuxuu u baahan yahay in uu baaro waqtiga kuu xadidan tarxiilkaaga kaas oo uu ka heli karo Dukumintigaaga.

**Nasiib wacan, Guul iyo Mustaqbal Wanaagsan!**

## Talaabooyinka sharciga ah ee looga hortagi karo marka lala tiigsado Qareen/Looyar:

Haddii aadan rabin in lagu tarxiilo, waxaad isku dayi kartaa inaad ku qanciso Xafiiska Federaalka ee Socdaalka iyo Qaxootiga (Bundesamt) in ay tahay inay isticmaalaan qaddiyad madax banaan iyo in ay fuliyaan nidaamka magan-gelyada ee Jarmalka. Si kastaba ha ahaatee, tani aad ayay u adagtahay.

Inta badan kiisaska, waa inaad aadaa maxkamadda maamulka oo aad codsataa joojinta tarxiilka, arintaas oo waajib ku ah Xafiiska Federaalka ee Socdaalka iyo Qaxootiga in ay fuliyaan nidaamka magan-gelyo ee Jarmalka.

Waxaad heli doontaa Amarka Fulinta tarxiilka (Abschiebebescheid) ka hor inta aan lagu tarxiilin. Waa baqshad jaale ah oo weyn. Waa inaad ku xereysaa Racfaan ka dhan ah tarxiilkaaga maamulka degaanka laba toddobaad gudahood ka dib markaad heshay warqada (taariikhda markii aad heshay warqada waxaa lagu qoray buqshada jaalaha ah. Digniin: taariikhdaas aya la tirsanaya, ma ahan waqtiga ay gacantaada soo gasho, sidaas darteed waxaad u baahan tahay inaad hubiso sanduuqa boostada maalin kasta!). Dhibaatadu waxay tahay in rafcaanku uusan lahayn wax saameyn ah oo lagama maarmaan ah taas oo micnaheedu tahay in weli lagu tarxiili karo xitaa haddii maxkamaddu aysan go'aamin racfaankaaga. Sidaa darteed, waxaad sidoo kale xareyn kartaa rafcaan deg-deg ah oo ku saabsan saameynta shaki (Eilantrag für aufschiebende Wirkung) taas oo macnaheedu tahay in aad weydiisatid maxkamada in ay dalbato saameynta go'aanka racfaanka.

**DIGNIIN: Haddii rafcaankaaga degdegga ah ee saameynta shakiga (Eilantrag für aufschiebende Wirkung) ay diido maxkamadu, lixda bilood ee xaddidan ayaa mar labaad dib u bilaabmaysa laga bilaabo maalinta diidmada!** Sidaa daraadeed wax macno ah kuma samaynayso talaabadani xaaladaha oo dhan! Gaar ahaan marka qayb waqtiga ka mid ah mar hore uu tago iyo xaaladaha aad ku qiyaasi kartid ka hor inta aan maxkamaddu soo diidin, waxay noqon kartaa si daggan inaan la SAMAYNIN midan. Xaalad kasta kahor waxaad u baahan tahay talo qof khibrad u leh, ha noqoto xafiiska la-talinta ama qareen.

**DIGNIIN: Racfaanka deg-deg ah oo ku saabsan saamaynta shaki (Eilantrag für aufschiebende Wirkung) kaliya waxa lagu xareyn karaa 1 asbuuc kadib markaad hesho warqadda jaalaha ah! Racfaankaaga deg dega ah waa in uu ahaado macquul. Waa inaad la xiriirtaa qareen sida ugu dhakhsaha badan uguna sharaxdid si faahfaahsan sababta aadan u rabin in lagu tarxiilo, tusaale ahaan, sharaxaadda waxa kugu dhacay wadanki Dublinka ee aad faraha lagaaga qaadey.**

Haddii aad jirran tahay, naafo tahay ama aad tahay qof argagaxsan/naxsan, waa inaad ka heshaa warqad caafimaad takhtarka si aad u cadeyso. Haddii ay jiraan dad magangalyo-doon ah oo aan dhaqdhaqaaqeyn oo aan awoodi karin inay iskood u codsadaan caawimaad, fadlan ka caawi inay helaan xaruun la-talin, takhtar ama qareen.

Haddii rafcaanka degdegga ah la diido, waxaad ku xereyn kartaa cabasho Maxkamadda Dastuurka ee Jarmalka, haddii cabashada ay diido Maxkamadda Dastuurka, waxaad ku xereyn kartaa cabasho Maxkamadda Yurub ee Xuquuqda Aadanaha. Talaabooyinkani wax macno ahah kuma samaynayan xaalad kasta waxaad u baahan tahay inaad kala hadasho qareenkaaga, haddii ay u maleeyaan inay suurtagal tahay iyo inaysan ahayn.

## Sida looga hortago tarxiilka daqiiqadda ugu dambeysa:

Haddi waqtiga talaabooyinka sharciga ah laqaadi laha uu dhacey oo aad halis u tahay tarxiil degdeg-ah waxaa kuu muhiim ah inaad akhriso qaabka la isku difaaco:

**http://w2eu.info/germany.en/articles/germany-deportation.en.html**
**https://www.youtube.com/watch?v=g2Umb7MyDhw&feature=youtu.be**
**http://nodeportation.antira.info/abschiebungen-verhindern/**

Tilmaamahan waxaa qoray shabakadda „Welcome to Europe", taas oo ay sameeyeen boqolaal firfircoon oo laga soo bilaabo 2009-kii, si toos ah ugu fidiyey taageero ajaanib iyo qaxootiba. Qaar naga mid ah waxaa soo wajahday dhibaatooyinka xuduudaha ay abuuraan oo ay ku hanjabeen in iskood isku tarxiilaan - kuwa kale waxay ku dhasheen Yurub. Waxaan taageereynaa qaxootiga meelaha aan ku nool nahay iyo meelo kale oo aan ka dhaqdhaqaaqno, sababtoo ah anaga dadka oo dhan way noo siman yihiin. Waxaan u halgamayna xoriyadda dhaqdhaqaaqa sida uu xaqa u leeyahay qof walba iyo adduunyo aan xuduud lahayn.

Tilmaamahan waxaa lagu hagaajinayaa dhammaan ajaanibta loogu hanjabay waxa loo yaqaano tarxiilka Dublin-ka ee laga tarxiilayo Jarmalka ilaa waddamo kale (sida Talyaaniga, Hungary, Bulgaria ama Giriig).

Tilmaamahan waxaa la qorey August 2017-kii waqtigan aad heshey waxa lagayaaba iney wax iska badaleen. Halkan ayaad ka akhrisan-kartaa kana soo dajisan-kartaa asago dhan:
http://w2eu.info/germany.en/articles/germany-dublin2.en.html
(luqado kalena waad ka heli-kartaa)

Macluumaad aad u badan ayaad ka heli kartaa webka-yaga Ku Soodhawaaw Yurub oo ku qoran luqadaha Carabi, ingriisi, faarisi iyo faransiis: http://w2eu.info/